Xarunta Gargaarka Sharuucda ee Xuquuqda Aadamiga

Centre for Equality Rights in Accommodation
Centre pour les droits à l'égalité au logement

Nidaamka Cusub ee Xuquuqda Aadamiga Ontario

Sida aad usoo dhancsaneysid Xuquuqdaada Aadamiga

Shurrucda Xuquuqdaada Aadamiga ee Ontario

Sharciga Xuquuqdaada Aadamiga waxuu tilmaamayaa xuquuqda qofkasta oo ku nool Ontario. Waxuu sheegayaa in kulligeen aanu xaq u leenahay inaan ka madaxbaanaano fal- takoorid.

Shrcigu siyaabo badan ayuu fal- takoorid kaaga badbaadinayaa, sida marka aad joogtid:

Goobtaada shaqada
Goobaha adeegyada guud sida maqaaxiyada iyo masraxyada Shaleemada
Goob aad shaqo ka raadineysid
Goob aad ijaar ka raadsaneysid
Masrka aad la xaajooneysid milkiilaha hanti ma guurtada leh
Meel aad ka istacmaaleysid adeegyada guud sida isbitaalada iyo iskuulada

Qasab maaha in fal-takooristu ay noqoto mid kas ah. Qof ayaa fal-takooris kuu geysan kara isagoon ogeyn.

Fal-takooridda noocyo badan ayey noqon kartaa. Waa ku sharcidaro in qof milkiile ah, shaqo-bixiye ah, ama adeeg-bixiye ah inuu si aan xaq aheyn kugula dhaqmo, kuu diido gunno aad xaq u leedahay, ama kugu xagliyo sababaha soo socda:

Cimrigaada
Muwaadinimada iyo meesha aad ka timid
Xaaladaada guur-ahaaneed (marital status)
Labnimadaada ama Dheddignimadaada ama dooqaada galmada (gender or sexual orientation).
Curyaanimadaada
Diintiisa
Jinsiyadaada, midabkaada, qoladaada ama dhalashada hore (ancestry)
Qaadashada lacagta gargaarka bulshada (guriyeenta oo keliya)
Fal dembi ood horay u gashay (shaqaaleyn keliya)

Mithaalo Fal-takooris ku Saabsan Guryaha

Dhanka Da'da: Marka milkiilha guriga uu kuu diido inuu guri kaa ijaaro isagoo sabab ka dhiganaayo maadaama aad tahay arday inuu is leeyahay ardaydu way buuq badan yihiin.

Dhanka Muwaadinimada iyo meesha Asal ahaan ka timid: Marka milkiilha guriga uu kugu xiro sharuudo dheeraad ah, maadaama aad qof koyto ah tahay. Mathalan, waxey ku weydiisay inaad la timaado qof damiin kaa noqda oo waraaqaha kula saxiixo.

Nooca Qoyska: Marka Iidhehda guri ijaarista (advertisement) ay tilmmameyso in guriga laga ijaarayo qof "*qaan-gaar oo keliya*." Arrintan waxey xaqiraad ku tahay dadka caruurtya leh.

Xaaslenimada Qofka: Waxaad tahay qof dumar ah oo dhowaan la furay, sidaas darteed milkiilaha guriga wuu kuu diiday in guri lagaa ijaaro maadaama aadan laheyn taariikh maaliyaddeed (credit history).

Dheddignimadaada: milkiilaha guriga wuu diiday inuu ku siiyo waraaqaha guri ijaarka maadaama uu arkay inaad tahay qof xaamilo ah.

Curyaanimadaada: marka milkiilaha guriga uu diido inuu tixgeliyo baahidaada jir ahaaneed ama maskaxahaaneed. Mathalan, maadama aad tahay qof curyaan tahay oo gaari-socod wata, milkiilaha waxey diiday iney guriga ku rakibto aaladaha aad u bahan tahay.

Qaadashada Gargaarka bulshada: Milkiilaha guriga wuxuu iidhehdiisa ijaarka ku tilmaamay inuu mudnaanta siinayo "qofka shaqeeya." Sidoo kale, wuxuu arjigiisa ijaarka uu dadka qaata gargaarka bulshada ku xiraa shuruudo dheeraad ah sida lacagta ijaarka oo bankiga toos lagala baxa ama saxiixa qof damiin ah.

Nidaamka Cusub ee Xuquuqda Aadamiga
Laga billabo 30ka Juun 2008, dadka deggan Ontario waxey kaga hortagi karayaan xaqiraadda ama fal-takoorita nidaamka cusub oo la dejiyay. Nidaamkan wuxuu leeyahay saddex qeybood:

Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga ee Ontario

Haddii aad aaminsan tahay in lagu xaqiray, waxaad **si toos ah** arji ugu qoran kartaa Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga Ontario. Haddii aad rabto inaad dalbato arjiga dacwada ama aad hesho xog dheeraad, halkan kala soo xiriir Maxkamadda:

Telefoon: 416-314-1312
Telefoon Lacag-La'aan ah: 1- 866- 598-0322
www.hrto.on.ca

Xarunta Gargaarka Sharuucda ee Xuquuqda Aadamiga
Xarunta Gargaarka Sharuucda ee Xuquuqda Aadamiga oo dadweynuhu maalgeliyay ayaa la sameeyay si dadka doonaya iney dacwadooda u gudbiyaan maxkamad ay u helaan talooyin sharciyeed. Howsha la xiriirta adeegaasi waa lacag la'aan. Halkan kala soo xiriir Xarunta:

Telefoon: 416- 314-6266
Telefoon Lacag-La'aan ah: 1-866-625-5179
www.hrlsc.on.ca

Guddiga Xuquuqda Aadamiga Ontario

Guddiga Xuquuqda Aadamiga Ontario waxuu hormariyaa xuquuqda aadamiga isagoo sameynayo cilmi-baarisyo ama kobcinayo aqoonta guud ee dadka ama u doodayo xuquuqda aadamiga. Halkan kala soo xiriir:

Telefoon: 416-326-9511
Telefoon Lacag-La'aan ah: 1-800-387-9080
www.ohrc.on.ca

Qaabka Cusub ee loo Qorto Arjiga

Maxkamadda waxey dejisay nidaam cusub oo ay ku gargaarto dadka aaminsan in meel looga dhacay xuquuqdooda aadamiga.

Tilaabada 1aad: Gudbinta Arjiga

Waxaad awoodaa in arjiga dacwadaada aad gudbisid **illaa hal sano** gudaheeda kadib marka aad la kullantay falka xaqiraadda.

Waxaad kaloo ka codsan kareysaa hey'ad kale inay magacaada ay arjiga ku gudbiyaan.

Arjigaada waa inuu si cad u tilmaamaa xaqiraadda aad la kullantay oo eyadaada ah.

Arjigaada waa inuu si buuxda ugu caddahay magacyada marqaatiyada iyo dokumenti kasta oo muujin kara falka-xaqiraadda oo laguu geystay.

Tilaabada 2aad: Jawaabta Eedeysanahu

Qofka ama sharikadda xaqiraadda kuu geysatay wuxuu helayaa fursad uu kaga jawaabo eedda iyagoo iskooda u hadlaya.

Tilaabada 3aad: Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga

Maxkamadda waxey kaa caawineysaa **xal ka gaarista** fal takoorista.

Waxaa lagu siinayaa fursad **dhexdhexaadin ah**. Sidaas darteed qof khabiir ku ah amuuraha xuquuqda aadamiga, ayaa kaa caawinaaya sidii adiga iyo milkiilaha ama shaqo-bixiyahu heshiis u gaari laheydeen.

Waxaa suuragal ah in lagaa codsado inaad ka qeybgasho shir **dhegeysi** ah ood ku micneyso falka laguu geystay.

Tilaabada 4aad: Go'aanka Maxkamadda

Haddii dhexdhexaadinta lagu guuleysan waayo, waxaa la qaban doonaa shir dhegeysi ah. Sidaas darteed, haddii Dhexdhexaadinta ama Dhageysiga kaddib ay Maxkamadu go'aamiso in xuquuqdaada meel looga dhacay, waxaa dhici kareysaa inaad hesho:

Lacag magdhow ah oo kaa shaafiso xaqiraadda laguu geystay.

Lacag "magdhow ah" oo qaasatan kaa daweysa khasaaro lacageedkii kaasoo gaaray koredhinta ijaarka oo kale.

Go'aan maxkamadeed oo milkiilaha lagu amrayo inuu abaabulo tababar-baraarujin ah ee ku saabsan dhoorista xuquuda aadamiga iyo ka-hortagga fal-takoorista ama xaqiraadda.

Go'aan maxkamadeed oo oo lagu xaqiijinayo in qofka gefka sameeyay uusan mustaqbalka soo socda ku xad-gudbeyn sharciga.

Lacag Magdhow Ah

Nidaamka cusub wuxuu suuragelinayaa in qofku helo **magdhow lacageed** oo kii hore ka badan.

Illaa Imisa Ayaa Dacwadu Qaadaneysaa?

Wax hal sano ka yar ayaa maxkamaddu arrintaada go'aan uga gaari kartaa. Haseyeeshee, waxaad arrintaada si taa ka dhaqsi badan ugu xallin kartaa habka dhex-dhexaadinta.

Xarunta Sinaanta Xuquuqda iyo Meel-dejinta (CERA) iyo Xarunta Gargaarka Sharuucda ee Xuquuqda Aadamiga (HRLSC) gargaar ayey diyaar idinla yihiin.

Hadii aad moodo in laguu geystay xaqiraad la xiriirta **helista ama ku jirista guri**, waxaa arrintaas kaa caawini kara Xarunta Sinaanta Xuquuqda iyo Meel-dejinta (CERA). Xarunta Gargaarka Sharuucda ee Xuquuqda Aadamiga (HRLSC) waxey kaa caawini kartaa arrin kasta oo la xiriirta Xuquuqda Aadamiga.

Xarunta Sinaanta Xuquuqda iyo Meel-dejinta (CERA) waxey:

- Jawaab buuxda iyo talooyin kaa siineysaa xuquuqda sharciyeed oo aad leedahay waxeyna kaala doodeysaa fursadaha aad leedahay.
- Ku siineysaa dokumentiyo iyo macluumaad aad daalacan karto.
- Gucashooyinkaada kala hadli kartaa milkiilaha, waxeyna kala xaajoon kartaa wixii xal ah.
- Kaa gargaari kartaa gudbinta arjiga dacwda ku hagaaji neysid Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga Ontario.

Wac Telefoonka: 1-800-263-1139 ext. 22
ADEEGYADOO DHAN WAA LACAG LA'AAN
Waa Gurigaada
U Istaag Xuquuqdaada!
Waa sida keliya oo lagu joojin karo xaqiraadda.

Xarunta Sinaanta Xuquuqda iyo Meel-dejinta (CERA)waxaa la aasaasay 1987. Waa hey'ad samafal ah oo ka madaxbanaan dowladda oo u dooda xuquuqda aadamiga iyo guriyeenta.

Xarunta Gargaarka Sharuucda ee Xuquuqda Aadamiga (HRLSC)
waxaa la furay Juun 30, 2008, si ay dadka ku nool gobolka Ontario ugu fidiso adeegyo iyo talo-siin dhanka sharciyada, si ay arjiyada dacwada ay ugu gudbin karaan Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga Ontario.

Xarunta Gargaarka Sharuucda ee Xuquuqda Aadamiga
400 University Avenue, 7th Floor
Toronto Ontario M7A 1X8
Telefoonka Dibadda: 1-866-625-5179
Telefoonka Toronto: 416-314-6266
Tel Dhagoolka: 416-314-6651
Tel Dhagoolka Lacag-la'aanta: 1-866-612-8627

Xarunta Sinaanta Xuquuqda iyo Meel-dejinta
Xafiiska Toronto:
340 College Street
Sarta 101A, Box 23
Toronto, Ontario M5T 3A9
Telefoon: 416-944-0087
Tolefoon Lacag La'an: 1-800-263-1139

Xafiiska Ottawa:
200 Maclaren Street, 2nd floor
Ottawa, Ontario
K2P 0L6

Taarka: 416-944-1803
E-mail: cera@equalityrights.org
Shabakadda Internetka: www.equalityrights.org